
**SAYNIS IYO SUUGAAN ISKU SIDKAN**

Caliqeyr M. Nuur
28 Disembar 2022

Qormadani waxay si dulxaadis ah u kormareysaa buugga la yiraa "*Arxan-goys*" ee uu dhigay abwaan Xasan C. Calasow "Shiribmaal" kuna saabsan jirrada Covid-19 ee noqotay aafadii qarniga. Gugii 2022 ayey madbacadda Laashin ka soo saartay dalka Sweden.




Ogaalkeyga, kani waa buuggii ugu horreeyey ee af Soomaali looga qoro jirradan cusub, wuxuuna ka mid yahay dhiganayaashii ugu iibsiga badnaa marka loo eego waxsoosaarka kale ee madbacadda Laashin. Sidaas ha ahaatee, danta qormadani waa inay xusto dhaliilaha iyo samaanta hibada uu qoraagani kaydka ku soo biiriyey.

**Xogta guud**

Daabaca: Laashin – Katrineholm, Sweden.
www.laashin.com
Bogagga: 155
ISBN: 978-91-986819-6-3

## ARAR

Covid-19 oo ah arrinka uu buuggu ka hadlayo waa laan ka baxda buktooyinka halista ah ee neefmareennada saameeya *(SARS-CoV-2).* Dhammaadka gugii 2019 ayuu ka dillaacay magaalada Wuhan ee dalka China, kaddibna wuxuu si daran ugu faafay adduunka oo dhan. Qoraagu wuxuu jirradan u bixiyey *Arxan-goys.* Ujeedka eraybixintu waa in aafadani tahay mid sokeeyihii kala xayirtay oo cabsi la kala qabo ama bandow sharci ah dartiis ku kala irdheysay. Dhanka kalana, waa mid arxankii (xigaaladii) kala goysay oo sokeeye badan iilka u dirtay. Labada dacalba, waa magacbixin xeerinaysa saamaynta taban ee ay jirradu ku yeelatay nolosha dadyowga.

## GUNDHIGGA BUUGGA

"Arxan-goys" waa buug la qoray bishii koowaad ee jiritaanka Covid-19. Inkasta oo uu qoraagu ka warramayo saamaynta oo cudurkani duniga ku yeeshay, haddana waxaad mooddaa in uu arrinka u dhigayo sidii sheeko suugaameed. Waase sheeko iyada oo dhammi dhacaysa muddo laba saacadood gudahood ah. Kolka aad buugga dhameyso ayey arrintani kuu leedahay milicsi qurxan; waa  marka aad dib u eegto gaabnida waqtiga dhacdada iyo badnaanta xogta ka soo baxaysa, ama baaxadda uu maanka dabarka furani gooshi karo.

Bilowgii aafadan, waxay saxaafaddu muujinaysay welwel, digniino, iyo werin saacadle ah balse naxdin leh. Cisbitaalladii ayaa buuxsamay, ganacsiyadii ayaa irdaha loo laabay, dhaqaaqii bulshada oo dhanna waa la xayiray. Cidna ma saadaalin karin waxa ka dhuroobi doono xaaladaha is rogrogayo. Sidaas darteed, qof waliba halkiisa ayuu geeri ama badbaado ku sugayey. Sida uu qoraagu sheekada ku bilaabayo *"Waxa aan ku dhacdiidaa kursi aan waayo badan ku fadhiistay aniga oo samaan iyo fayoobi dareemayo, barqadaan jimcaadse wedkii ayaa iridda igu soo garaacay, wuxuuna i leeyahay: soo bax!"* Kaddibna sheeko dheer ayaa dhexmaraysa isaga iyo wedkii u yimid (Covid-19).

Wada sheekeysigaasi wuxuu dhexmarayaa qoraaga dareenkiisa togan, dareenkiisa taban, iyo wedkii iridda u soo garaacay. Waa saddex jile oo uu mid kastaaba xog iyo farriin u gaar ah sido. Maadaama uu qoraagu laashin yahayna, koodkoodu waa tix iyo tiraab isku saagulan balse nuxur badan. Waxay gorfaynayaan saamaynta uu Covid-19 ku yeeshay caalamka, xasillooni-darrida uu abuuray, burburka dhaqaale ee uu geystay iyo weliba wareerka xagga fikirka ah ee dunida ku baahay. Inkasta oo ay kala-maan yihiin, haddana waxay saddexdaan qofi diiradda saarayaan siyaasadda, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada oo ah dhardhaarta uu Covid-19 saldhigtay. Is warsiga koowaad, wuxuu dhexmarayaa Covid-19 iyo qoraaga. Kolkii uu iridda ka furay ayey sidan isku bariidinayaan:

*Waxaan iri: ninkaan soo dhocow hadalka ii dhiib bal?*
*Wuxuu yiri: dhammaad iyo billaaw dhega maqluu yeelo.*
*Waxaan iri: waxaad dhaaggantahaan kaa dhursugayaa.*
*Wuxuu yiri: dhaldhalaalki dunidaya anaa dhaqanki naafeeyay.*

*Waxaan iri: Ilaaheey ma dhihin wayna dhicisoobin.*
*Wuxuu yiri: dhur iyo kheyr wadaa jeer dhaw dhalan doona.*
*Waxaan iri: dhankow naga xigaa wow dhibtoonnahaye?*
*(Arxan-goys, b. 67)*

Inta uu is warsigu socdo wuxuu Covid ka hadlayaa dhibka uu geystay iyo kan uu maaggan yahay, fal kastaana wuxuu ku sifaynayaa in ay ujeeddo isaga la wanaagsani ka dambeyso. Sida uu cudurkani sheeganayo, qorshihiisa koowaad waa in aadanaha laga cuuryaamiyo xaglaha diinta, dhaqanka iyo dhaqaalaha. Wuxuu oranayaa "*Marka hore, si dadka loo jiheeyo, waxaa irdaha loo laabay Xarankii Muslimiinta, si loo waayo laba isugu timaada ee Alle ku barida. Marka labaadna waxaa la xiray goobaha ay barakeystaan dadyowga Shiicada ah ee dalka Iiraan, intaas ka dibna, waxaa la xiray xarumihii ugu waaweynaa ee diimaha Kirishtaanka iyo Yuhuudda. Weligaa ma is waydiisay halbeegga loogu billaabay xiritaanka afartaas meelood oo Aadanaha ahmiyad gaar ah u leh*?" (Arxan-goys, b. 72)

Halkan wuxuu qoraagu isaga oo marna Covid ah, marna u laba-bogleynaya labadiisa dareen ee tabanaha iyo toganaha kala ah ku rogrogayaa saameynta laga filan karo aafadan, marka lagu saleeyo arrimaha diinta iyo dhaqanka. Ogow! Goorta uu qoraagu buuggan dhigayo, Covid wuxuu jiraa todobaadyo yar. Wuxuuse saadaalinayaa in ay shirkado badan salkici doonaan, dalal awood lihi wiiqmi doonaan, aafaduna raagi doonto ilaa inta laga hirgelinayo qorshe cusub oo meesha ka saarayo nidaamkii gaboobay ee dunida ka jiray.

Isla bishaasba waxaa irdaha loo laabay badi warshadihii dalka Shiinaha iyo dalal kale oo ay aafadu ka soo muuqatay. Waxaa yaraaday isweydaarsigii badeecooyinka, heer caalami. Waxaa kor u laalmay miisaankii isku dheellitirayey dalabka suuqa iyo waxsoosaarka badeecadaha, taas oo laga dhaxlay sicirbarar aan lagu tashan. Waxaa dib loogu noqday gumaradii dhigaalka ahayd, caymisyadii nabdoonaa iyo kabitaan walba oo laga heli karay dowlad ama hay'ad kasta ee loo ciirsan karay.

Sida ay qormo xeeldheere sheegtay *(Wang, Wenzhao iyo Enilov, Martin, 2020),* saameynta ugu daran waxay aafadani gaarsiisay dalalka G7 oo leh 32 – 46% waxsoosaarka warshadaha iyo dhaqaalaha ugu xooggan ee adduunka. Saddex-xagalkii ahaa *soosaaraha, iibiyaha* iyo *iibsadaha* ayaa xabsi-guri wada galay, bulshooyinkiina qalqal weyn ayaa ku dhex baahay. Dadkii waxaa isu raacay naftooda oo ay u welwelaan, xigaalo dhimatay oo ay ka murgaan iyo hubaal li'ida mustaqbalkooda. Sida uu qoray wargeyska Sage-Journals *(Pawar, M., 2020)* durbadiiba wuxuu Covid-19 dadyowga adduunka u saameeyey si daran oo xag jireed iyo xag maskaxeedba aan kala liidan.

Sida uu qoraagu u dhigayo, isaga oo jilayo doorkii Covid *"Sabab kale ma aha ee waxaa la doonayaa in dadka la kala xeyndaabo, laguna yiraahdo ha is taabannina, hana isa soo booqana, meelna ha isugu imaannina, kiinna dhintana ha aasina ...* (Arxan-goys b. 73). Halkan ama isagu (Covid) ha sheegto in uu ka dambeeyo qorshaha, ama ha ahaado aalad ay cid kale adeegsato, balse wuxuu sii hordhacayaa sah kastaba saha xigi doono.

Xasan C. Calasow "Shiribmaal" waa gabyaa maanso-dhaadhi ah, waana aqoonyahan diimeed. Tayadaasi aad ayey uga dhex-muuqataa buugga, waxaadna arkaysaa in uu si layaab leh iskugu xirayo sooyaalka ummadihii hore, aayadaha Quraanka iyo xaaladda beryihii uu qoraalkan weday. Waxaa jirtay murti uu Confucius lahaa oo tiraa *"Qofna ma garaadsan ilaa uu ka rumaysto in dabaysha ka baxda baalka ay balanbaalistu rogto uu adduunka dacalkiisa kale duufaan ka dhalin karo."* Waa murtida laga tixraacay arigtada la yiraa "Saamaynta Balanbaalista *(The butterfly effect)* ee uu curiyey Edward Norton oo ahaa xisaabyahan iyo xeeldheere saadaasha cimilada. Waxay aragtidani muujisaa sida qotada dheer ee dunidu iskugu xiran tahay oo isbeddelkii meel ka dhaca uu dacallada kale u saamayn karo. Taas waxaa la mid ah *"Hindhisadii Shaydaanka"* oo ah cinwaanyaraha buuggan. Qoraagu wuxuu halkan nagu tusayaa sida ay hal hindhiso oo taws lihi u kala gaartay daafaha adduunyada. Waa humaageyn layaab leh oo akhris uun looga bogan karo. Haddiise si guud loo fiiriyo, dulucda buuggani waa in uu muujiyo saddex arrin oo kala ah: dhabnimada jirradan, in ay tahay hub dagaal, in ay salka ku hayso loollan siyaasadeed iyo mid dhaqaale, iyo in la buunbuuniyey iyada oo dano gaara laga leeyahay. Xitaa, qofkii aan weligiis maqlin Covid-19, tani waa sheeko qurux badan, waana buugga qura ee intii aan wax akhrinayey isku sidkay saynis, suugaan, siyaasad, diin iyo sooyaal bulsheed intaba. Waa qormo loo adeegsan karo dano madadaalo iyo waxbarasho labadaba.

## Gunaanud

Qormadani waxay ahayd guudmar waxa uu buuggani ku saabsan yahay iyo bogdooxyo tusaale ah. Aad ayaan uga gaabsaday meelaha qaar aniga oo ka baqayo in aan dhab u cabbiri waayo farshaxanka iyo afka suugaameed ee uu qoraagu adeegsanayo. Herdanka siyaasadeed ee dhaqaalaha iyo awoodda ku saabsan ayuu saarayaa raajo wax kastaaba qayaxaysa. Welwelka bulshada ayuu maaro u raadinayaa. Labadiisa dareen oo jilayaasha sheekada ka mid ah ayuu wixii maangal ahna uga hadalsiinayaa dareenkiisa togan, wixii aan maangal ahayna dareenkiisa taban u siinayaa. Covid-19 oo uu Arxan-goys u bixiyeyna intuu qofeeyey ayuu ka werinayaa sababaha, saamaynta iyo doorka uu ku leeyahay waayaha nolosha. Waxaan filayaa in buuggani jeexo tub werineed cusub oo xogteeda dheellitiri karta.

## *Tixraac*

Fabíola Ortiz dos Santos (2021) *Myths and Misconceptions on Covid-19.* https://doi.org

Pawar, M. (2020). *The Global Impact of and Responses to the COVID-19 Pandemic.* https://doi.org

Shlomo Maital , Ella Barzani (2020) *The Global Economic Impact of COVID-19.* https://www.neaman.org

Xasan C. Calasow (2022). *Arxan-Goys.* Kartineholm, Swedem.